# Diiwaangelinta Early Achievers

***Ujeeddada Early Achievers:*** Early Achievers waxay awood siisaa daryeel bixiyeyaasha iyo barayaasha iyadoo adeegsanayso agabyo si ay u taageeraan waxbarashada iyo horumarka ilma kasta si ay u horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan dugsiga iyo nolosha. Ka qaybqaadashada Early Achievers ayaa loo baahan yahay si ay u aqbasho kaalmada Xiriirada Shaqadada ee Daryeelka Caruurta (Working Connections Child Care, WCCC) ama ay u adeegto Barnaamijka Caawinta Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education Assistance Program, ECEAP).

***Waxa ku saabsan Taageerada Aqoonsiga Tayada iyo Hagaajinta (Quality Recognition and Improvement, QRIS) ee Early Achievers, La xiriir***: QRIS@dcyf.wa.gov ama 1-866-922-7629

## Si aad isaga diiwaan geliso Early Achievers ee gudaha MERIT, Raac Tillaabooyinka Hoose

**1.** Laga bilaabo bogga hore ee MERIT, taabo bogga Facility/Site (Xarunta/Goobta) ee ku taal xagga sare ee bogga.

*Fadlan Ogow: Haddii aadan lahayn bogga facility/site, fadlan buuxi diiwaangelinta xarunta/goobta.*




**2.** Guji bogga Early Achievers ee buluuga ah ee hoos yimaada faahfaahinta Facility/Site.




**3.** U gudub qaybta lagu calaamadiyay "Quality Recognition and Improvement (QRIS) Application" (Codsiga Aqoonsiga iyo Hagaajinta Tayada) oo dooro Early Achievers Registration (Diiwaangelinta Early Achievers).

## MERIT - DIIWAANGELINTA EARLY ACHIEVERS



**4.** Bogga 1aad ee codsiga, xaqiiji in macluumaadka barnaamijku sax yahay kadibna ka dooro liiska hoos u furma Xiriirka Koowaad ee QRIS. Macluumaadka barnaamijka si toos ah ayaa loogu buuxiyaa iyadoo lagu salaynayo faahfaahinta xarunta ee MERIT. Haddii mid ka mid ah macluumaadkan uu khaldan yahay, fadlan la xiriir shati bixiyahaaga ama iimaylka QRIS.

*Fadlan Ogow: Xiriirada koowaad iyo labaad e ee Early Achievers waa dadka goobtaada jooga ee mas'uul ka ah maaraynta ka qaybqaadashada Early Achievers. Xiriirka aasaasiga ah ee Early Achievers ayaa mas'uul ka ah kormeerka iyo dhameystirka dhammaan howlaha Early Achievers. Barnaamijyada waxbarashada hore halkaasoo ay joogaan xubno badan oo shaqaale maamul ah, xiriirka labaad ee Early Achievers ayaa loo magacaabi karaa inuu taageero.*



**5.** Bogga 2aad ee codsiga, waxaad mar kale ku xaqiijin doontaa macluumaadka barnaamijkaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka. Waxaad markaas buuxin doontaa dammaanadda codsiga adiga oo saxaya sanduuqyada la saxayo ee ku xiga bayaan kasta. Damaanadu waxay sheegaysaa inaad fahantay ka qaybqaadashada Early Achievers inay tahay ikhtiyaari iyo inaad akhriday oo aad fahantay Tilmaamaha Hawsha QRIS. Saxiix oo gudbi codsiga.

*Fadlan Ogow: Magaca ku yaal sanduuqa saxiixa waa inuu si sax ah u waafaqaa magaca milkiilaha koontada MERIT ee aad isticmaalayso si aad u buuxiso codsiga.*

